



# Faafin Rasmi ah

EE JAMHURIYADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

Sannadka 2aad

Muddisho, 1 Oktoober 1974

L. 10

Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah  
ee ka tirsan Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

## FAAFIN BIL SOO BAXA

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Samaliya gudel-eeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydusto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilabimaa i Janayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinaya Xafiska Canshurata ee Wasaaradda Lacagta

## KOBNIIN BOGGA KOOWAAD

### S H A R C I

SHARCI L. 32, Tr. 19 Agosto 1974 — *Awoodda Wasaaradda Maaliyadda ay kula wareegi karto macaashka Bankiyada, Wakxaaladdaha, Wershadaha ,iwm.*

Bog. 447

SHARCI L. 33, Tr. 5 Seb. 1974 — *Cashuurta guryada.*

» 448

## BOGGA LABAAD

### X E E R

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KA- CAANKA, Tr. 28 Maaris 1974, L. 97 — <i>Magacaabid Agasimaha Guud ee Bankiga Horumarinta Soomaaliya.</i>	» 450
XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KA- CAANKA, Tr. 31 Agosto 1974, L. 98 — <i>Shaqo ka fa- dhiisin saraakiil Bolis ah.</i>	» 451
XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KA- CAANKA, Tr. 1 Seb. 1974, L. 99 — <i>Magacaabid Gud- doomiye Gobol.</i>	» 452
XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KA- CAANKA, Tr. 1 Seb. 1974, L. 100 — <i>Magacaabid Gud- doomiye Gobol.</i>	» 453

SHARCI L. 33, Tr. 5 Seb. 1974.  
Canshuurta Guryaha.

MADAXWEYNAHA  
GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Go'aankii 1aad kan 2aad ee Kacaankii 21ka Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY Qodobka 30aad ee Sharciga 14 Agoosto 1963, tiradiisuna tahay 19 iyo baddalka ka dambeeyey ee caddeynayay Canshuurta iyo xuquuqda ay Dawladaha Hoose qaadi karaan.

MARKUU ARKAY Sharciga 1d Agoosto 1966, tiradiisuna tahay 12 ee ku saabsan baaridda iyo ciqaabta lagu qaado jabinta Sharciyada Dhaqaalah.

MARKUU OGAADAY In loo baahan yahay in la soo saaro Sharci ciqaabaya qofkii bixin diida cashuurta ay qaadaan Dawladaha Hoose ee Degmooyinka oo ah Canshuurta Guryaha Carshaanta ah, Baraakoooyinka iyo wixii kale oo la mid ah (Imposta fissa sulle abitazione tradizionale) iyo cashuurta Qiimaha Guryaha Daaraha ah (Imposta proporzionale sul valore accertato dei fabbricati).

MARKUU ARKAY Taladii uu soo jeediyay Xoghayaha Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee uu ogaaday in ay tahay lagama maarmaan in awood loo siiyo Dawladaha Hoose ee Degmooyinka in ay ka qaadi karaan tilaaboooyinka Sharcigaan uu u oggolaanayo qofkii bixi waaya cashuurta kor ku qoran.

ISAGOO TIXGELINAYA Go'aanka Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha.

WUXUU DEJINAYAA SHARCIGA SOO SOCDA

Qodobka 1aad

*Waqtiga cashuurta lagu bixinayo*

Cashuurta qiimaha guryaha daaraha ah iyo midda guryaha carshaanta, baraakoooyinka iyo wixii kale ee la mid ah, waxaa la bixinayaas sannad kastaba 31ka Jannaayo ilaa 31ka Maayo.

Qodobka 2aad

*Bixin qayb qayb ah (pagamento a rate)*

Qofkii lagu leeyahay cashuur ka badan hal sanno ee aan awoodi karin in uu mar qur ah bixiyo, waxaa u banaan in uu seddex qaybood (a rate) u bixiyo cashuurta lagu leeyahay ilaa muddo 6 bilood ah.

### Qodobka 3aad

*Ganaax muddo daah ah (diritto di mora)*

Haddii cashuurta ku qoran qodobka 1aad lagu bixin waayo ilaa 31ka Maayo, ganaax muddo daah ah (diritto di mora) oo ah 5% ayaa qofkaas la saari doonaa ka billaabato 1da Juunyo ilaa 30ka Juunyo cashuurta lagu leeyahay.

### Qodobka 4aad

*Xayiraad*

1. Qofqii ku bixin waaya cashuurta ku qoran qodobka 1, ilaa 30ka Juunyo Dawladaha Hoose ee Degmocinka waxay awood u leeyihiin haddii guriga cashuurta lagu leeyahay ijaar loogu jiro inay ka qataan ijaarka dadka ku jira ilaa cashuurta lagu leeyahay ay ka dhamaato, ayadoo qofka guriga leh la siin doono warqad marqaati fur ah;

2. Haddii guriga cashuurta lagu leeyahay ijaar aanan loogu jirin, cashuurtana lagu bixin waayo ilaa 30ka Juunyo, Dawladaha Hoose waxay awood u leeyihiin:

- (a) inay sugaan inta guriga la ijaaranayo;
- (b) in qofka guriga lehi uusan gadi karin guriga ilaa lacagta Dawladda Hoose ku leedahay ay ka dhammaato.

### Qodobka 5aad

*Ka dhaafid (esenzione)*

Dawladaha Hoose waxay awood u leeyihiin inay siiyaan warqad caddaynaysa (certificate of bankruptcy) qofkii:

- (a) gurigiisa ku jira ee ay ogaadaan inuusan shaqaysan kari; iyadoo ay ugu wacan tahay waayeelnimo ama jirro (per vecchiaia o per malattia);
- (b) gurigiisa ku jira ee ay caddaato inuusan waxba haysanin nul-latenente).

### Qodobka 6aad

*Baabi'n (abrogazione)*

Sharci kasta ee ka soo horjeeda sharcigaan waa la baabi'yey.

### Qodobka 7aad

*Dhaqangalid*

Sharcigaan wuxuu dhaqan galayaa maalinta lagu soo saaro waqadda Rasmiga ah ee Dawladda (Bollettino Ufficiale).